



Gacaliyayaal Qoysas,

Sannad Wanaagsan! Waxaan rajeyneynaa inaad qaadateen waqti wanaagsan sidii aad u isticmaasheenba.

Kaamka ciyaaraha ee The HAF waqtigii fasaxa lagu jiray si wanaagsan ayaa looga soo qeyb galay aadna ayey u wanaagsan tahay in la maqlo in carruurta ay si shuraako ah u wada-shaqeeyeen ulana shaqeyeen shaqaalaha ka socday Sports Foundation.

Waxaan ka wada-hadleyay Go'aannada Sannadka Cusub waqtigii kulanka guud ee usbuucaan – waxaan dooneynaa in ay carruurta ka fekeraan waxa ay hiigsanaayaan sannadkaan kuna mashquulaan sidii ay u gaari lahaayeen. Yoolalkaas waxay noqon karaan kuwo bulsho ama waxbarasho. Fadlan kala hadal afkaarkaas iyaga.

Maadaama imaanshaha uu muhiim yahay, hey'ad ahaan carruurteenna Key Stage Two waxay ka qeyb qaadatay doonaan daraasad ku saabsan imaanshaha oo dugsiga ka dhaceysa maadaama aan dooneyno in aan ballaarinno fursadaha waxbarsho ee carruurta oo dhan.

Mahadsanidiin,
Mrs L-H



Imaanshaha

Celceliska imaanshaha dugsiga ee usbuucii ugu dambeeyey ee xilligii hore wuxuu ahaay **93%**.

Yoolkeenna waa 96%. Imaansho wanaagsan waxay carruurta oo dhan siisaa fursadooyinka macquulka ah ee waxbarashadooda marka fadlan arrintaan nagu caawin.

Hambalyo Fasallada **4, 5 iyo Y6** kuwaasoo gaaray imaansho **97%** usbuucii ugu dambeeyey ee xilliga–waxaad dhaafteen yoolkeennii ahaa 96%. Waxaa u dhawaa in ay gaaraan yoolkaas Fasalka **3** oo keenay imaansho **95%**. Dadaala Fasallada R, 1 iyo 2 – waxaan ognahay in aad gaari kartaan yoolkaas idinkana.

Xasuusin inaan fileyno in carruurta dugsiga joogaan xilliga waxbarashada fasaxyadana in la qorsheeyo waqtiga dugsigu fasax yahay si ay saameyn ugu yeelanin waxbarashada.

Badbaadada Internetka



Badbaadada Internetka waxaa kaloo ku jira fahamka isku-halleynta waxa laga akhriyo internetka. Fadlan kala hadal canuggaada si qof walba oo lagu arko ama laga daawado internetka uusan ahayan wax run ah.

RELIABLE: Someone online might lie about who they are, and information on the internet may not be true. Always check information with other websites, books or someone who knows.

Rags to Riches

Ka dib guushii sannadkii hore, waxaan mar kale weydiisaneynaa dhar walba oo loogu tabaruci karo Rags to Riches – tan waa hab wanaagsan ee lagu caawinaayo kownta iyadoo ah deegaan-saaxibeed iyo u soo saarid xoogaa lacag ah dugsiga. Dharka waxaa la keeni karaa dugsiga 16^{da} iyo 17^{da} Jannaayo fadlan.



Gaari-Dhigashada

Xusuusin ahaan si jidka looga dhigo mid u nabdoon sida ugu macquulsan si ay carruurta iyo qoysaska u gooyaan, waxaan weydiisaneynaa inaan gaari la dhigin meesha huruudda ee sig-saagga ah ayna gaari dhigashadaada ahaato mid sharci ah. Waxaa dooneynaa in qof walba uu ahaado mid nabdoon marka uu dugsiga imaanaayo ama ka tegaayo iyo sidoo kale in la hubiyo in dadka meesha deggenna ay heli karaan meel ay ka gaaraan gawaaridooda si nabdoon. Waad ku mahadsan tahay wada-shaqeyntaada arrintaan ku aaddan.



Buug Beddelasho

Mahadsanid cid walba oo isticmaaleysa Buug Beddelashada Xafiiska dhexdiisa; waa hab wanaagsan oo ay carruurta ku akhriyaan buugaag badan iyo sidoo kale mid ah Deegaan-Saaxibadeed.



Taariikhaha Xusuus-Qorka

- 9^{ka} Jan – Subaxa Qaxwada ee Mrs L-H
- 20^{ka} Jan – Rags to Riches ku keenidda dharka bacyo ee dugsiga 16^{ka} or 17^{ka} Jan
- 11^{da} Feb – Daryeelayaasha Bristol /Madasha Waalidiinta Subaxa Qaxwada iyo booqashada Guddiga Akadeemiyada
- 17^{da}-21^{da} Feb – Fasaxa Xilliga, dugsii ma jiro
- 17^{da} Maars – Maalin INSET day, dugsii uma jiro carruurta.

Cabot's core values are:

Partnership **Inclusion** **Excellence**